

Fariin Muhiim ah oo kasocota dhinaca Maamulka Daryeelka Caafimaadka

Foomka IRS 1095-B ee lasoo lifaaqay waxaa loogu talagalay qofkasta oo qaatay ceymiska aasaasiga ah ee ugu yar ee laga qaato tooska Washington Apple Health (Medicaid) midkaas oo loogu talagalay hal bil ama bilooyin baddan oo sannadka canshuurta ah.



Maxaan U qaadanayaa foomkan maxaana kusameeyaa?

Foomkan canshuurta wuxuu bixinayaa macluumaad aynu kuugu soo diri doono Adeega Dakhliga Gudaha ah (IRS) midkaas oo khuseeya caymiskaaga caafimaadka ee loogu talagalay sannad canshuureedka. Haddii aad fayl gareyso canshuuro ama haddii aadan samaynba, kadhig foomkan mid aad diiwaanadaada kuqorto ama tixraac kuu noqda.

Si aad u oggaatid haddii ay khasab kugu tahay in aad fayl gareyso canshuuro ama ay khasab noqon doonto in aad fayl gareyso xitaa haddii aanan loo baahnayn, booqo boggaan internetka www.irs.gov ama latasho xirfadle canshuur.



Mayihiin dhammaan ceymis kujirida Apple Health kuwo ah ceymiska aasaasiga ah ee ugu yar?

Ma ahan dhammaan ceymis kujirida Apple Health kuwo Ceymis Kujirida Aasaasiga ah ee ugu Yar. Kaliya dadka haystay ceymiska aasaasiga ah ee ugu yar ee loogu talagalay sannad canshuureedka ayaa lagu qori doonaa foomka 1095-B.



Maxaan sameeyaa haddii macluumaadku uu khaldanyahay ama kamaqanyahay foomkayga 1095-B?

Ka wac Xarunta Adeega Macamiilka ee Caawimaada ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka lambarkan: si aad si toos ah ugula hadashid wakiilka adeega macamiilka lambarkan **1-800-562-3022**.



Maxaan sameeyaa haddii aan u baahanahay foom bedel ah?

Dooro mid kamid ah doorashooyinkaan soo socda si aad u dalbatid mid bedel ah:

- Tooska internetka: <https://fortress.wa.gov/hca/p1contactus/> (ka dooro "1095-B" liiska keenida ee hoose)
- Telefoonka: 1-800-562-3022



Wixii kusaabsan macluumaad dheeri ah ee khuseeya caymiska Apple Health iyo foomka 1095-B, gal boggaan internetka: www.hca.wa.gov/1095-b

Su'aalaha canshuurta iyo illooyinka



Gal boggaan internetka: www.irs.gov



Wac 2-1-1

Ama Macluumaadka Khadka Shaqeyaa Marwalba ee Clear 1-888-201-1014

Haku soo celinin foomkan dhinaca HCA. U hayso foomka 1095-B si aad wax ugu qorotid.